# Casharka 36

1. Marka Muuse uu joogay Buur Siinay dusheeda ee uu la hadlayey Ilaah, maxay reer binu Israa’iil ka samaynayeen buurta hoosteeda?
-Reer binu Israa’iil waxay samaysteen weyl dahab ah, oo way caabudayeen iyada.

2. Miyaa Ilaah garanayaa in reer binu Israa'iil ay caabudayeen weyl dahab ah?
-Haa.

3. Miyaa Ilaah u caraysnaa reer binu Israa'iil?
-Haa.
-Ilaah aad iyo aad buu ugu carooday reer binu Israa'iil, oo wuxuu doonayey inuu burburiyey.

4. Waa maxay sababta Ilaah aanu u burburinin Israa'iil?
-Waayo Muuse ayaa Ilaah ka baryey inaanu burburinin iyaga.

5. Muxuu Muuse sameeyey markii uu yimid Buur Siinaay hoosteeda?
-Muuse aad buu u caraysnaa oo wuxuu caro awgeed tuuray labadii loox ee dhagaxa ahaa ee sharcigu ku qornaa oo way kala jabeen.

6. Maaddaama Muuse jebiyey labadii dhagax ee Ilaah ku qoray tobanka wasiyadood, Maxaa Ilaah u sheegay Muuse inuu sameeyo?
-Ilaah wuxuu Muuse ku yiri waxaad la timaaddaa laba dhagax oo kale buurta dusheeda halkaasoo mar kale Ilaah ku qoray tobanka wasiyadood.



7. Haddii reer binu Israa'iil aanay u dhisi lahayn taambuugga sidii Ilaah yiri, miyaa Ammaanta Rabbigu soo geli lahayd taambuugga?
-Maya.

8. Miyaa reer binu Israa'iil Ilaah ugu dhowaan kareen habkooda ama hannaankooda?
-Maya.

9. Muxuu ahaa jidka keliya ee reer binu Israa'iil ay ku awoodeen inay Ilaah ugu soo dhowaadeen?
-Dariiqa Ilaah.

10. Sidee baannu ku garanaynaa haddaba dariiqa Rabbiga?
-Waxaannu ku garanaynaa kitaabka Qoduuska ah, ee Baybalka.

-Ilaah wuxuu doortay Muuse si uu reer binu Israa'iiluga soo wado Masar iyo gurigii addoonsiga.

-Muuse wuxuu kaloo ahaa farriin-walihii Ilaah.

-Markii Ilaah doonayey inuu la hadlo reer binu Isra'aiil, wuxuu la hadli jiray Muuse, oo isaguna la sii hadli jiray reer binuIsraa'iil.

-Ilaah wuxuu hoggaaminayey Muusesi reer binu Israa'iil uu ugu sheego waxa Ilaah doonayey.

-Waxaa kaloo Ilaah ku hoggaamiyey Muuse inuu qoro wax waliba ee Ilaah doonayey inuu qoro.

-Wuxuu ahaa Muuse kii qoray shanta kitaab ee ugu horraysa ee Baybalka.

-Sidee buu Muuse ku garanayey waxa ay tahay in la qoro?

-Ilaah baa Muuse ku hoggaamiyey inuu qoro wax waliba ee Ilaah doonayey inuu qoro.

-Reer Binu Israa'iil waxay ka tageen dhulkii Masar, oo waxay sii dhex marayeen lama-deganka.

-Maaddaama reer binu Israa'iil ay dhex marayeen lama-degaanka, sidee bay ku garan kareen hala ay ku socdaan?

-Ilaah baa hoggaaminayey.

Bal aynu akhrinno Baxniintii 40:36-38

36-Oo markii daruurtii taambuuggii kor ahayd laga qaaday ayaa reer binu Israa'iil hore u sii wadeen sodcaalladoodii oo dhan,
37-laakiinse haddii aan druurtii kor loo qaadin, ma aya socon jirin ilaa maalinta kor loo qaado.
38-Waayo, daruurtii Rabbiga maalintii taambuugay dul joogi jirtay, habeenkiina waxaa daruurtii ku jiri jiray dab, reer binu Israa'iil ood hammuna waxyaalaha ayay arki jireen sodcaalladoodii oo dhan.

-Markii Ilaah doonayo in reer binu Israa'iil ay sodcaalka joojiyaan, daruurta ayaa marka hore istaagi jirtay.

-Markii Ilaah doonayo inay sodcaalka billaabaanna, daruurta ayaa socon jirtay.

-Kaddib markii Ilaah reer binu Israa'iil siiyey tobanka sharci, oo la sameeyey taambuuggii Ilaah, ayaa Ilaah daruurtii sare u qaaday.



-Halkee baa Ilaah haddaba ku wadaa reer binu Israa'iil?

-Ilaah wuxuu ku hoggaaminayaa reer binu Israa'iil dhulkii kancaan, waana dhulkii uu ka ballan-qaaday awowgood Ibraahim.

-Reer binu Israa'iil waxay daba-socon jireen daruurta, Ilaahna wuxuu keenay xuduudda dhulka reer Kancaan.

-Markii reer binu Israa'iil ay yimaadeen xuduudda Kancaan, maxaa Ilaah u sheegay in Muuse sameeyo?

Bal aynu akhrinno Tirintii 13:1-2

1-Markaasaa Rabbigu Muuse la hadlay oow uxuu ku yidhi,
2-War waxaad dirtaa niman soo basaasa dalka reer Kancaan oo aan reer binu Israa'iil siinayo, oo qabiil walba waa inaad nin ka dirtaan, oo mid kastaaba ha ahaado amrii iyaga ku jira.

-Ilaah wuxuu Muuse u sheegay inuu doorto 12 nin oo ka kala socda 12ka qabiil ee reer binu Israa'iil, si ay u tagaan oo dalka u soo indha-indheeyaan.

-Muuse wuxuu raaay amarkii Rabbiga, wuxuuna diray 12 nin oo soo baarta ama basaasta dhulkii reer Kancaan.

Bal aynu akhrinno Trintii 13:3

3-Markaasaa Muuse iyagii ka diray cidladii Faaraan sidii amarkii Rabbigu ahaa, oo kulligood waxay ahaayeen rag reer binu Iraa'iil madax u ahaa.

-Ka hor intaanu Muuse aanu dirin 12kii basaasyada ahaa inay

dalka soo baaraan, muxuu iyaga ku yiri?

Bal aynu akhrinno Tirintii 13:17-21

17-Markaasaa Muuse iyagii u diray inay dalkii reer Kancaan soo basaasaan oo wuxuu iyagii ku yidhi, jidkan koonfureed xaggiisa u kaca oo buuraha fuula.

18- Oo waxaad soo fiirisaan dalku siduu yahay, iyo dadka degganu inay xoog badan yihiin iyo inay itaal yar yihiin, iyo inay tiro badan yihiin.

19-Iyo dalka ay deggan yihiin siduu yahay inuu wanaagsan yahay iyo inuu xun yahay, iyo magaalooyinka ay deggan yihiin siday yihiin, inay xerooyin deggan yihiin iyo inay qalcado xoog badan ku jiraan.

20-Iyo siduu dalku yahay inuu barwaaqaysan yahay iyo in kale, iyo inuu dhir leeyahay iyo in kale. Haddaba dhiirannaada oo dalka midhihiis akeena. Oo wakhtiguna wuxuu ahaa xilliga uu canakbka hore bislaado.

21-Haddaba iyagii way tageen oo waxay soo basaaseen dalkii tan iyo cidlada Sin iyo ilaa Rexob oo ku t aal meesha Xamaat laga galo.

-Markii afartankii maalmood ay soo dhammaadeen, 12kii nin waxay ka soo noqdeen dhulkii Kancaan.

-Haddaba 12kii dhulka inay basaasaan loo diray waxay Muuse iyo reer binu Israa'iil u sheegeen wax ku saabsan dhulkii Kancaan.

Bal aynu akhrinno Tiritii 13:27-29

27-Oo Muuse bay u warrameen oo waxay ku yidhaahdeen, Annagu dalkii aad noo dirtay waan gaadhnay, oo hubaal wuxuu la



barwaaqaysan yahay caano iyo malab, oo midhihiisiina waa kuwan.

28-Habase yeeshee dadka dalka degganu waa xoog badan yihiin, oo magaalooyinkuna deyrar bay leeyihiin, waana waaweyn yihiin, oo weliba waxaannu halkaas ku soo aragnay reer Canaaq.

29-Oo reer Camaleeq waxay deggan yihiin dalka xaggiisa koonfureed, oo reer Xeet iyo reer Yebuus iyo reer Amoorna waxay deggan yihiin buuraha, oo reer Kancaanna waxay deggan yihiin badda agteeda iyo Webi Urdun dhinaciisa.

-Dhulkii reer Kancaan wuxuu ahaa dhul caano iyo malab la barwaaqaysan.

-Wuxuu kaloo ahaa dhul ay ku badan yihiin dad xoog badan oo waaweyn.

-Caasimadaha reer Kancaan aad bay u xoogganaayeen, oo welibana derbiyadoodana way dheeraayeen.

-Laba-iyo-tobankiinin ee dhulka soo basaasaysay, toban ka mid ah Illaah ma ayan rumaysnayn.

-Maxay haddaba tobanka nin ee aan Ilaah rumaysnayn ay u sheegeen reer binu Israa'iil?

Bal aynu akhrinno Tirintii 13:31-33

31-Laakiinse nimankii isaga raacay waxay yidhaahdeen, War innagu dadkaas kuma kici karno, waayo, way inaga xoog badan yihiin.

32-Oo iyagu dalkii ay soo basaaseen ayay reer binu Israa'iil war xun uga keeneen, oo waxay yidhaahdeen, Dallka aannu dhex

marnay oo soo basaasnay waa dal cuna dadka deggan, oo dadkii aannu ku aragnay oodhammuna waa dad aad u dhaadheer.

33-Oo waxaannu halkaas ku aragnay dad waaweyn oo xoog badan oo ah reer Canaaq oo ka yimid dadkii waaweynaa oo xoogga badnaa. Waxaannu isula yaraannay sida kabajaan oo kale, oo hortoodana sidaas oo kalaannu ku ahayn.

-Maa maxay saabta tobanka nin ee aan rumaynin Ilaah aanay u doonayn inay galaan dhulkii Kancaan?

-Tobanka nin aad bay uga cabsadeen dadka waaweyn oo xoogga badan oo ku nool dalkii Kanaan.

-Tobanka nin ee basaasyada ahaa ma aanay rumaysnayn in Ilaah leeyahay awood uu kaga adkaado dadkan reer Kancaan.

-Tobankan nin ma ayan rumaysnayn ballankii Ilaah ee ahaa inuu reer binu Israa'iil siinayo dhulka Kancaan.

-Tobanka nin waxay reer binu Israa'iil u sheegeen inaanay gelin Kancaan.

-12kan nin, waxaa ku jiray lab qof oo Ilaah rumaysan.

-Waxaa la kala oran jiray Kaaleeb iyo Yashuuca.

-Maxaa Kaaleeb iyo Yashuuca ku yiraahdeen reer binu Israa'iil?

Bal aynu akhrinno Tirintii 13:30

30-Markaasaa Kaaleeb dadkii ku aamusiiyey Muuse hortiisa, oo wuxuu ku yidhi, War haddiiba ina keena, aynu dalka



qabsannee, waayo, innagu waynu karyanaa inaynu ka adkaanno.

-Waa maxay sababta Kaaleeb iyo Yashuuca loo doonayo inay galaan dhulkii Kancaan.

-Kaaleeb iyo Yashuuca kama ayan cabsanaynin dadkii waaweynaa oo xoogga badnaa ee ku noolaa dhulkii Kancaan.

-Kaaleeb iyo Yashuuca waxay rumaysnaayeen in Ilaah aad iyo aad u awood badan yahay oo uu reer Kancaanna naafayn karo ama ka adkaan karo.

-Kaaleeb iyo Yashuuca waxay rumaysnaayeen Ballankii Ilaah siiyey reer binu Israa'iil ee ahaa inuu reer binu Israa'iil siinayo dhulkii reer Kancaan.

-Kaaleeb iyo Yashuuca waxay reer binu Israa'iil u sheegeen inay Ilaah addeecaan oo galaan dhulka.

-Miyaa reer binu Israa'iil maqleen tobankii nin ee aan Ilaah rumaysnayn, mise waxay maqleen Kaaleeb iyo Yashuuca oo iyagu Ilaah rumaysnaa?

Bal aynu akhrinno Tirintii 14:1-4

1-Oo shirkii oo dhammuna codkoodii bay kor u qaadeen oo qayliyeen, oo dadkiina habeenkaas way ooyeen.
2-Oo reer binu Israa'iil oo dhammuna waxay u gunuuseen Muuse iyo Haaruun, oo shirkii oodhammu waxay iyagii ku yidhaahdeen, Waxaa inoo roonayd inaynu dalkii Masar ku dhimanno! Amase inaynu cidladan ku dhimanno!
3-Bal Rabbigu muxuu inoogu soo kexeeyey dalkan aynu

seefta ku le'anayno?  Naagaheenna iyo dhallaankennu dhac bay noqonayaan.  Sow inaynu Maar ku noqonno inooma roona?

4-Oo markaasaa midba midkii kale ku yidhi, Kaalyaya aynu madax doorannee oo aynu Masar isaga noqonnee.

-Reer binu Israa'iil waxay maqleen tobankii nin ee aan Ilaah rumaysnayn, oo ma ayan doonayn inay galaan dhulkii Kancaan.

-Kaaleeb iyo Yashuuca mar kalay la hadleen reer binu Israa'iil.

Bal aynu akhrinno Tirintii 14:6-9

6-Oo Yashuuca ina Nuun iyo Kaaleb ina Yefunneh oo kuwii dalka soo basaasay ka mid ahaa ayaa dharkoodii iska jeexjeexay.

7-Oo waxay la hadleen shirkii reer binu Israa'iil ood han oo ku yidhaahdeen, War dalkii aannu dhex marnay oo aan soo basaasnay waa dal aad iyo aad u wanaagsan.

8-Oo haddii Rabbigu inagu farxo, ayuu dalkaas ina geeyn doonaa, oo wuu ina siin doonaa dalkaas caanaha iyo malabka la barwaaqaysan.

9-Laakiinse Rabbiga ha ku caasiyoobina, oo ha ka cabsanina dadka dalka deggan, waayo, waxay inoo yihiin sida kibis oo kale.  Daafacoodii korkooda waa laga qaaday, oo Rabbiga inaguu inala jiraaye; iyaga ha ka cabsanina.

-Kaaleeb iyo Yashuuca waxay dadkii reer binu Israa'iil ka baryeen inaanay Rabbiga ku caasiyoobin.

-Kaaleeb iyo Yashuuca waxay reer binu Israa'iil u sheegeen in Ilaah awood uu reer Kancaan ku wiiqo uu leeyahay.



-Miyaa reer binu Israa'iil ay aqbaleen inay galaan dhulkii reer Kancaan?

Bal aynu akhrinno Tirintii 14:10a

10-Laakiinse shirkii oodhammu wxay yidhaahdeen, Iyaga ha la dhagxiyo.

-Reer binu Israa'iil ma ayan doonaynin inay dhulka Kancaan galaan.

-Reer binu Israa'iil weli ma ayan doonayn inay Ilaah addeecaan.

-Reer binu Israa'iil waxay doonayaan haatan inay dhagxiyaan Kaaleeb, Yashuua, iyo Muuse.

-Miyaa Ilaah maqlay waxa reer binu Israa'iil ay lahaayeen?
-Haa.

-Miyaa Ilaah garanayaa in reer binu Israa'iil ayan doonayn inay galaan dhulkii Kancaan?

-Haa.

-Miyaa Ilaah garanayaa in reer binu Israa'iil aanay rumaysnayn in Isagu uu leeyahay awood waada x ah oo uu ku wiiqo ana naafeeyo reer Kancaan?

-Haa.

-Miyaa Ilaah garanayaa in reer binu Israa'iil aanay rumaysnayn ballankiisii ahaa in iyaga uu siinayo dhulka Kancaan?

-Haa.

-Reer binu Israa'iil ma ayan rumaysnayn in Ilaah dhowrayo ballankiisii ahaa inuu iyaga siin doono dhulka kancaan.

-Haddii aynaan rumaysnayn farriinta Ilaah, maxaynu Ilaah ugu yeeraynaa?

-Beenaale.

-Reer binu Israa'iil ma ayan rumaysnayn farriinta Ilaah.
-Reer binu Israa'iil waxay Ilaah ugu yeereen Beenaale.

-Ilaahna sidan buu leeyahay:

Bal aynu akhrinno Tirintii 14:26-32

26-Markaasaa Rabbigu la hadlay Muuse iyo Haaruun, oo wuxuu ku yidhi,
27-Ilaa goormaan u adkaysanayaa shirkan sharka ah oo ii gunuusa? Waxaan maqlay gunuuskii ay reer binu Israa'iil ii gunuuseen.
28-Waxaad iyaga ku tidhaahdaa, Rabbigu wuxuu leeyahay, Noloshaydaan ku dhaartaye, hubaal sidaad dhegahayga ugu hadasheen ayaa idinku amaynayaa.
29-Meydadkiinnu waxay ku dhici doonaan cidladan, oo kulli kuwiinna la tiriyey sidii tiradiinnu ahayd oo ah intii labaatan sannadood jirtay ama ka sii weynayd oo aniga ii guusay,
30-hubaal idinku geli maysaan dalkii aan ku dhaartay inaan idin dejinayo, Kaaleb ina Yefunneh iyo Yashuuca ina Nuun mooyaane.
31-Laakiinse yaryarkiinna aad tidhaahdeen Waa la



dhacayaa, iyagaan keeni doonaa, oo iyagu way baran doonaan dalkii aad diiddeen.
32-Laakiinse idinku meydadkiinnu way ku dhici doonaan cidlada.

-Maaddaama reer binu Israa'iil ay diideen inay Ilaah rumeeyaan, yaa gelaya dhulka Kancaan?

-Wxaa gelaya oo keliya Kaaleeb, Yashuuca, iyo reer binu Israa'iil.

-Maaddaama reer binu Israa'iil diideen inay rumaystaan Ilaah, sidee baa Ilaah u ciqaabayaa iyaga?

-Ma gelayaan Kancaan.

-Iyaga oo dhan lama-degaanka ayey ku dhiman doonaan.

-Ilaah wuxuu had iyo goorba ku ciqaabayaa dhimasho kuwa diiday inay Isaga rumaystaan.

-Dadkii Nuux maalintiisii waxay diideen inay Ilaah rumaystaan, Ilaahna wuxuu ku ciqaabay iyaga dhimasho.

-Dadkii reer Soddom iyo gomorrah waxay diideen inay Ilaah rumaystaan, oo Ilaahna wuxuu iyaga ku ciqaabay dhimasho.

-Fircoon iyo reer Masar waxay diideen inay Ilaah rumaystaan, Ilaahna wuxuu iyaga ku ciqaabay dhimasho.

-Ilaah wuxuu ku ciqaabayaa dhimasho ay u dheer tahay harada dabka aan demayn oo lagu tuurayo ruuxooda, kuwa diida inay isaga rumaystaan.